**War** saxaafadeed

# Ka hawlgelinta dadka reer Alberta ee ka hortagga midibtakoorka

Sebteember 22, 2022 Weydiimaha warbaahinta (Media inquiries)

## Dadka reer Alberta waxay gacan ka geysan karaan in ay dowladda ku wargeliyaan tallaabooyinka si ay wax uga qabtaan cunsuriyadda oo ay u dhistaan gobol loo wada dhan yahay.

Maadaama tirade dadweynaha gobolku sii kordhayo oo ay noqonayaan kuwo aad u kala duwan, dawladda Alberta waxaa ka go'an inay dhegaysato oo ay barato khibradaha dhammaan dadka Alberta u leh, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka la midabtakooray, Dadkii Hore (First Nation) iyo kuwa kale oo laga yaabo inay la kulmaan caqabadaha nidaamsan.

"Waan ku faraxsanahay shaqada socota ee la qabanayo si loola dagaallamo midab-takoorka nooc kasta oo ka mid ah gobolkayaga. Iyada oo la sii wado ka-qaybgalka bulshooyinka iyo kooxaha dhibanayaasha u ah cunsuriyadda, waxaan hubin doonnaa in Alberta ay tahay meel nabdoon oo qof walba uu ugu yeero gurigeyga. Waxaan ku martiqaadeynaa dadka reer Alberta dhammaan qaybaha kala duwan si ay u bixiyaan jawaab celin si ficilladeenu u noqdaan kuwo waxtar leh oo macno leh si aan u taageerno kuwa la kulmay midab-takoorka ama cunsuriyada gobolkayaga."

*Muhammad Yaseen, Wasiirka ku-Xigeenka Socdaalka iyo Dhaqanka*

Dhammaan dadka reer Alberta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay buuxiyaan xog uruurta khadka tooska ah an (online survey) ka hor Oktoobar 21. Waxay wadaagi karaan aragtidooda ku saabsan saameynta cunsuriyadda ee gobolkan iyo ficillada mustaqbalka ee si ay dowladda wax ug qabto cunsuriyadda.

Ka-qaybgalka dadweynaha waxay ku dhismi doontaa Alberta ee dhawaan la sii daayay Qorshaha Waxqabadka Ka-hortagga Midibtakoorka released (Anti-Racism Action Plan). Khariidad waddo oo waxqabad macno leh, qorshaha wuxuu qeexayaa sida ay dawladda uga go'an tahay kala-duwanaanta, meeshana ka saaraysa caqabadaha nidaamsan ee gelitaanka barnaamijyada dawladda iyo hubinta in dadka reer Alberta ay si siman u helaan macluumaadka iyo adeegyada. Golaha Latalinta ka Hortagga Midibtakoorka Alberta (Alberta's Anti-Racism Advisory Council) ayaa door muhiim ah ka qaatay shaqadan.

## Codso deeq si aad u martigeliso fadhi maxalli ah

Si loo siiyo fursado badan oo dadka reer Alberta ay ku wadaagaan aragtidooda, maalgelinta ayaa diyaar u ah qowmiyadaha, kooxo diimeedka, dhaqanka iyo ururada bulshada, iyo Dadkaii Hore (First Nation) iyo xeryaha bulshada Metis si ay u martigeliyaan kulannada ka-hortagga cunsuriyadda oo toos uga qeybgalayo qofka. Ilaa 40 deeqo ah oo gaaraya ilaa $2,500 doolar ayaa diyaar ah, ururaduna waxay haystaan ilaa Oktoobar 21 inay codsadaan.

Ururadu waa inay qabtaan fadhiyada ugu dambayn 16ka Diseembar waxayna heli doonaan agabka taageerada dawladda. Ururada waaweyn iyo kuwa yaryar ee Alberta oo dhan waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan si ay u siiyaan noocyo kala duwan oo dadka reer Alberta ah fursad ay ku wadaagaan fikradahooda. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa alberta.ca.

## Ka qaybgalka Dadka Asaliga ah

Dowladda Alberta waxaa ka go'an runta iyo dib u heshiisiinta dadka asaliga ah. Ka-hawlgalayaasha dib-u-heshiisiinta, waxaanu dhegaysanaynaa oo aanu la shaqaynaynaa dadka asaliga ah ee Alberta si loo go'aamiyo hababka ugu wanaagsan ee loo maro mustaqbal wanaagsan.

Dawladda waxay martiqaadyo u fidin doontaa si ay ula kulanto madaxda heshiisyada 6, 7 iyo 8, iyo sidoo kale hoggaanka Xerooyinka Metis (Metis Settlements), Dadka Metis ee Alberta (Métis Nation of Alberta) iyo Xiriirka Mertis ee Alberta (Alberta Métis Federation) si loo hubiyo in aragtiyaha Dadka Asaliga ah ee ka hortagga cunsuriyadda lagu daro. Dadka Asaliga ah ayaa sidoo kale lagu casuumay inay qaataan sahaminta khadka tooska ah, iyo Dadkii Hore (First Nation) iyo Xeryaha Metis (Metis Settlements) iyo Xarumaha Saaxiibtinimada Dadka

Dhaladka ah waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan deeqaha si ay u qabtaan kalfadhiyada ay bulshadu hogaaminayso.

## Kulamada kale ee daneeyayaasha

Si loo ururiyo jawaab celin qoto dheer, dadka qaar iyo ururada ayaa lagu martiqaadi doonaa inay ka qaybqaataan kulamo dheeraad ah oo shaqsi ah oo lala yeesho Wasiirka ku-Xigeenka Socdaalka iyo Dhaqanka. Kulamadani waxay ka dhici doonaan Edmonton, Calgary, Red Deer, Lethbridge, Medicine Hat, Fort McMurray, Grande Prairie iyo Brooks.

## Xaqiiqado Degdeg ah

- Marka loo eego xogta tirakoobka ee ugu dambeysay ee la helay, 3,978,145 ee dadka ku sugan Alberta, 21.2 boqolkiiba (845,220) waa dad cusub, 23 boqolkiiba (933,165) waa dad laga tiro badan yahay oo muuqda iyo 6.5 boqolkiiba (258,640) waa Asali.
- Mawduucyada labada kulan ee shaqsi ahaanta ah iyo sahanka khadka tooska ah waxaa ka mid ah talaabooyinka ay tahay in ay dowladdu qaado si ay wax uga qabato cunsuriyadda iyo sida ay dowladdu u sii wadi karto ka qayb qaadashada bulshooyinka iyo dadka reer Alberta hindisayaasha ka hortagga cunsuriyadda. Sahanka kharka tooska ah waxa kale oo ku jira su'aalo ku saabsan ururinta xogta ku salaysan jinsiyadda.
- Dowladda Alberta waxay bilowday inay ka shaqeyso dhowr hindise oo ka dhan ah cunsuriyadda, oo ay ku jiraan:
    - Samaynta xiriirinta dembiyada nacaybka iyo Unugga Iskuduwidda Dembiyada Nacaybka (Hate Crimes Coordination).
    - Si rasmi ah u aqoonsanaya bilayska Dadkii Hore (First Nation) ee u horeeya sida uu dhigayo sharciga booliiska.
    - Mamnuucida dhaqanka beegsiga.
    - Soo bandhigida Barnaamijka Kaabayaasha Amniga ee Alberta (Alberta Security Infrastructure Program).
    - Dejinta Xeerka Dhaqanada Diiwangelinta Xaqa ah (*Fair Registrations Practices Act)* iyo abuurista Xafiiska Caddaaladda Dadka Cusub (Fairness for Newcomers Office) si looga caawiyo dadka reer Alberta ee cusub in la aqoonsado shahaadooyinkooda.
    - Dejinta siyaasad isgaarsiineed oo loo dhan yahay oo dowladda ah.

## Xog la xiriirta

- Ka qaybgalka kahortagga cunsuriyadda (Anti-racism engagement)
- Tallaabo ka qaadida cunsuriyadda (Taking action against racism)
- Bogga codsiga deeqda (Grant application page)
- Qorshaha Tallaabada Alberta ee ka Hortagga Cunsuriyadda (Alberta's Anti-Racism Action Plan)